



Su'aalaha badanaa la weydiyo cidda bixisa xanaanada-caruurta

Barnaamijyada xanaanada caruurta ee tayada leh waxay caruurta dareensiiyaan amaan, in la taageerayo iyo in la xanaaneeynayo. Waxay taageeraan waxbarashada iyo koriinka caruurta iyagoo dhisaya xiriirka aay la leeyihiin qoysaska iyo barayaasha, waxayna siiyaan degaan xanaano leh oo mashquuliya kana caawiya caruurta in aay koraan oo horumar sameeyaan.

Isticmaal su'aalahan si aay kuu hagaan marka aad raadineyso xanaano caruur oo tayo leh oo ku haboon baahida adiga iyo ilmahaaga.

KHARASHYADA IYO FIRAAQADA

1. Ilmahayga meel ma u heysaa? (haddii kale, ma jiraa liis sugitaan oo waa intee waqtiga la sugayo?)
2. Lacagta waa intee? Ma jiraan khidmo lacageed oo dheeraad ah? (weydii xanaano bixiyaha in uu sharaxo kharashyada dheeraadka ah tus., lacagaha fasaxyada, maalmaha jirada, qaadashada waqtiga dambe ama codsiyada)
3. Ma jiraan boosas la kabo (subsidized) oo laga heli karo xaruntan?
4. Ma bixisaan xanaano waqti-buuxa ama waqti-qeyb ah?
5. Waqtiyada la keeno/qaado waa sidee dabacsanaantooda?
6. Sidee beey xanaano bixiyayaasha kula xiriiraan waalidka iyo goorma ayeey booqan karaan waalidka?

XAQIIQO:

Waxaad dooran kartaa xanaano xarun ruqsad leh ama mid guri dhexdiisa ah. Qaar ka mid ah xanaanooyinka guryaha waxay la shaqeeyaan heya'd ruqsad leh kuwo kalena ruqsad ma leh. Kharashka waa kala duwan yahay.

CAAFIMAADKA IYO AMAANKA

1. Ruqsad ma leedahay mise ma lihid?
2. Imisa caruur ayaad xanaaneysaan?
3. Sideed ku sugi kartaan caafimaadka caruurta? (tus., hurdo, nadaafad)
4. Maxaa dhaca marka ilmo xanuunsado? (tus., guriga miyaa loo diraa mase daawaa la siiyaa)

XAQIIQO:

Xanaano bixiyayaasha aan ruqsadda lahayn 5 caruur wax ka badan gurigooda kuma xanaaneyn karaan.

ontario.ca/childcare

5. Waa maxay talaabooyinka amaanka sugaya ee jira?
(tus., dab-damiye, aaladda sheegta qaaca/CO, xirmada adeegga deg-degga, albaabada/furarka amaanka)
6. Waa maxay qorshihiina daadguridda caruurta ee xaaladaha deg-degga ah?
7. Ma siisaan daawada xasaasiyadda anaphylaxis caruurta leh xasaasiyad aad u xun?

CUNTO IYO NAFAQO

1. Cuntooyin waaweyn iyo yaryar oo nooc ee ayaad bixisaan?
2. Cuntada meesha miyaa lagu diyaariyaa mase waa la keenaa?
3. Cuntooyinka qaar miyaan aagga loo ogoleyn? (tus., looska ama kuwa kale ee xasaasiyadda keena)
4. Ma qaabili kartaan baahida nafaqo ee qoyskeena?
5. Qaboojiye caanaha naaska loogu talagalay maala heli karaa iyo ma jiraa jadwal cunto siinta loogu talagalay?

RAADI:

Qorshe cunto oo aay ku jiraan dhamaan 4ta koox oo cunto.

WAXBARASHO IYO CIYAAR

1. Maalinta oo dhan ilmahayga muxuu sameynayaa?
2. Sidee ayeey sheeyada lagu cayaaro gacan-uga-geystaan waxbarashada, halabuurnimada iyo isdhexgalka bulsho?
3. Sidee ku dhiirigelisaan ku ciyaaridda gudaha iyo dibadda? Waqti intee la eg ayaa dibadda lagu qaataa?
4. Sidee dhaqamada kala duwan loogu daraa barnaamijka?
5. Sidee ayeey xubnaha qoyska barnaamijka lug-ugu-yeeshaan?
6. Maxaa dhaca haddii ilmahayga uu xanaaqo ama calool-xumaado?

RAADI:

- Degaan taageera ciyaar iyo sahmin in aay wax ku bartaan caruurta.
- Qoyska in uu lug-ku- yeesho oo la soo dhaweeyo lana dhiirgeliyo.

XANAANEYAYAASHA IYO DADKA MIHINADAHA LEH

1. Shahaadooyin ama tababaro maxay ah ayeey shaqaalaha iyo xanaano-bixiyaasha leeyihiin? (tus. Bare Caruurta Yaryar oo Diiwaangashan (Registered Early Childhood Educator))
2. Ma joogaa aagga qof heystaa shahaado CPR iyo First Aid?
3. Maxaa dhaca marka shaqaale ama xanaano-bixiye uu jiran yahay ama maqan yahay?

RAADI:

Shaqaale ama xanaano-bixiye leh shahaadooyin ama tababaro la xiriira la shaqeynta caruurta.

ontario.ca/childcare